# Tallaal loogu tala galay infekshinka mindhicirka caloosha oo uu sababay feeyruska Rota

**Daryeelka caafimaadka caruurta ee gobalka Jönköping waxuu bandhigaa talaal lacag la'an ka hortago infekshinka feeyruska Rota. Talaalka waxaa la siiyaa dhallanka (aduunka ku cusub) laga bilaabo marka uu gaaro lix isbuuc. Talaalka waxuu ka difaacaa shuban iyo matag oo uu keeno feeyruska rota.**

## Waa maxay feeyruska rota?

Feeyruska Rota waa feeyruus la cadaaystay dhacdidiisa, aduunka dhana ku faafsan oo infekshin uu geeysanaayo mareenka mindhicirka caloosha.

## Caruurta yaryar aad ayee ugu jiran karaan

Infekshinka feeyruska rota ayaa badanaa ka danbeeyo infekshin dhab ah oo ku dhaco mareenka mindhicirada caloosha ee caruurta yaryar. Feyruuskaani waa mid faafintiisu ee aad uu badan tahay. Inta badan waqti hore ayaa la qabadsiiyaa. faafaa. Ku dhawaad dadka dhamaantoodana wuu ku dhacaa infekshinka feeyruska rota inta ee san gaarin shan sano.

Kadib ruuxa markii la qabad siiyo, in uu dhaxeeyso hal maalin iyo habeen ilaa sadaax maalin iyo habeen, ayaa sida cadaadu tahay ku bilaawdaan si degdeg ah matag, qandho, shubaan qafiif ah iskuna dhawdhaw. Si caadiga ah ruuxa waxuu jiranaadaa in uu dhaxeeyso 5-8 maalmood, laakin marmarka qaarkood intaas oo maalmood wee dhaftaa. Caruurta qarkood aad ayee uu jiradaan ayaagoo si isdabjoog ah uu matagaayo uuna shubmaayo. Taasi waxeey dhallaanku uu keeni kartaa jir qaleeyl. Waxaa kadib la socdo cusbada jirka oo qasmato, muruq kogid iyo caabuqa maskaxda. Infekshin feeyruus rota oo adag waxuu uu baahnaa karaa daryeel isbitaaleed.

Marar badan ayaa ruuxi la qabad siin karaa, sido kalana marar badan ayaa daraadiis loo jiran karaa laakin marka koobad ayaa ruuxu jiradu ugu badan tahay. Infekshinka feeyruska rota waxuu caada uu lee yahay dhicidiisa inta lagu febraayo ilaa maarso.

## Infeskhinka feeyruska rota qatartiisa intee la eg tahay?

Infekshinka caruurta uu ku dhacay iyo reerkooda culeeys badan ayuu saraa ayuu saaraa laakin caruurta badankood waxeey reeystaan daryeel isbitaal la'antiis. Caruurta ka yar labo sano ayaa halista ugu badan tahay in uu ku dhaco infekshin adag oo dhib uu yeelo wax kale. Waa dhif in uu ku haro dhawac. Kani in loo dhinto aad bee Iswiidhan dhif ku tahay.

## Talaalka Rotarix®

Talaalka lagu bandhigo gobalka Jönköping waxaa la dhahaa Rotarix®. Waxuu ka kooban yahay feeyrus tabartiis la yareeyay oo canuga siinaayo infekshin fudud, inta badana lama dareemo. Difaaca jirka ayuu canuga ka helaa tallaalnaan, waxuuna ka diifaacmaa shuban iyo matag ka yimaado feeyrusyada nucyada rota ee la cadeeystay aragtidooda.

Rotarix® waxaa laga helaa difaac fiican oo looga hortago infekshinkta feeyruska rota. Ugu horeeyn waxuu ka diifaacaa infekshinka oo keeno daryeel isbitaaleed. Tallaalka waxuu difaacaa ugu yaraan labo sano. Dhalaanta adunka ku cusub (caana nuuga) ayaa si gaar ah ugu baahan difaaca.

Rotarix® waxaa Yurub la keenay 2006, waxana la qeybiyay in ka badan 310 malyuun oo qiyaasan. Dalal badan ayaa hadda qorsho galiyay tallaal guud oo looga hortagaayo feeyruska rota kuwaasoo ku daray barnaamijkooda tallaalka qaranka. Bishii maarso ee sanadkii 2015 ayaa 77 wadan waxeey tallaalka rota ku dareen tallaallada qaran ee wadankooda. Dalalkaas waxaa ka mid ah Ostaraaliya (Australia), Mareeykan (USA), Ameerikada koofureed (Laatin Amerika) iyo Afrika iyo sgaal wadan oo Yurub ku yaal, Biljan, Oostari, Luksanborg, Fiinlad, Jarmalka, Ingiriiska, Noorwey iyo Leetland.

Qoraalka bagga danbe ayuu ka sii soconaa

## Tallaalka, habkee loo siyaa iyo gormee la siiyaa?

Talaalka waxuu ka kooban yahay dareere ku jiro qalab yar ee afka loogu shubaayo oo qiyaasan. Labo jeer ayaa afka laga siyaa dhalaanka, laga bilaabo marka uu ku jiro isbuuc lixaad. Tallaalka waa macaan oo waxuu ka kooban yahay maadada sonkorta. Wa la siin karaa dhalaanka, kuma xirno waxuu cunay. Haddii uu dhalaanka soo tufo ama soo matago badankeed, waxaa si toos loo siinayaa qiyaas cusub. Qiyaasta ama qeeybta 1 waa in dhalaanka la siiyaa marka uu dhaxeeyo lix iyo sideed isbuuc. Lix isbuuc ka hor ma habaano, laakina labo iyo toban inta ka horeeyso ayaa la doonaayaa. Ugu danbeeys inta uu san gaarin isbuuca 16aad

Qiyaasta ama qeeybta 2 waxaa la siinaa bil kadib markii la siiyay qiyaasta 1, waxaana la doonaaya isbuuca 16 inta ka horeeyso. Ugu danbeeys isbuuca 24aad inta uu san gaarin. Isbuuca 24aad kadib lama siinaayo tallalka. Dhalaanka waqti hore dhashay ee laakin dhashay kadib isbuuca urka ee 27aad, waa loo tallaali karaa sida kor ku qoran camal. Tallaalkaan waa la isla siin karaa tallaalkada kale ee ku jiro tallaalka barnaamijka ee qarameed oo caruurta loogu tala galay. Dhinaca-waxyeelleda

## Dhinaca-waxyeelleda

Dhinac waxyeelid ee la cadeeystay in la arko, waxuu ku dhacay 100kiiba hal dhalaan ama ka badan. Waxa ku dhaco waa shuban, matag iyo qandho ka fudud. Dhinac waxyeelid, oo xooga ka yar, waa calool xanuun, gaasyo iyo cuncun ku dhaco maqaarka. Dhinac waxyeelid aad uu dhif ah waa mindhic ceshoomo. Taasi mecneehed waxeey tahay in qeeybta ugu danbeeyso oo ka tirsan mindhicirka yar cadaadiyo mindhicirka weeyn, markaasna mindhicirka ayaa istaagaayo. Calamada jiro ee mindhicir cishoomida waa qeeylo isdabajoog ah, soo labaneeyso oona hakad badan leh bilaawgi, kadibna hakadku soo yaraanaayo. Dhalaanku wuu lalaboon karaa, wuuna matagi karaa. Saxaradu kama imaaneeyso laakin mararka qaarkood dhig iyo xabko. Dhalaanku waxuu noqonaa mid daalan, midablaawe eh, tamar dareeyey, waxuuna uu eh yahay mid maqan. Taasi haddii ee dhacdo si toos ah ayaa daryeel lo oodaa qeeybta dagdaga ah. Istaaga waxaa lagu xalinaa ayadoo la faaruqin mindhiqirrada.

## Tallaalka ka hor

Shaqalaha joogo daryeelka caruurta uga waran haddii uu dhalaanka

- xasaasi (allerji) wax ku yahay
- hada ka hor dhibaato ka la qabsatay Rotarix®.
- jiro qandho leh heeyso
- la siiyo ama goor dhaw la siiyay daawoyin, xataa kuwa waraqada dhakhtarka la'anted la iibsan karo
- goor dhaw tallaal kale la siiyay
- laga qalay ama laga baraayo cilad ku jirto mareenka mindhirada caloosha.
- qabo cudur yereeynaayo awood iska celinta infekshinada
- xariir la lee yahay, tusaale ahan, qof ka tirsan reerka oo awoodiisa nidamka difaaca jirka ee daciifsantay, tusaale ahaan qof cudur qabo ama qaato daawo daciifineeyso nidaamka difaaca jirka.

## Tallaalka ka dib

La xariir kalkaalisada bukaanka ee joogto rugta caafimaadka caruurta, haddii aad dareemto wax aad ku cadeeysan dhalaankada mudada ku xigto ee ugu soo sokeeyso tallaalka kadib. Sido kale waxaad wici kartaa 1177 si aad uu hesho talobixin caafimaad.

**In kale oo ku jirto 1177 Talobixinta caafimaadka**

- Shubanka qabto dhalaanka
- Calool xanuunka qabto carurta yaryar (Magsjuka hos små barn) – maxaa si gooni ah looqaban karaa?
- Barnaamijka talaalka caruurta
- Barnaamijka-Asaasiga daryeelka cafimaad-ka caruurta ee gobolka Jönköping

Qoraalka waxuu sido kale ku jiraa qeeybta *Caruurta iyo waalidka*

Qoraalka waxaa la cusbooneysiiyay bisha nofembar 2016: Nambarka qoraalka waa: 90632604